







*WAAXDA HELITAANKA CAAFIMAADKA VERMONT*

# Barnaamijyada Farmashiyaha
# Buug-gacmeed

GreenMountainCare
A HEALTHIER STATE OF LIVING

# Attention! If you need help in your language, please call 1-800-250-8427

انتباه! إذا كنت بحاجة إلى مساعدة بلغتك ، فيرجى الاتصال
على 1-800-250-8427

သတိပြုရန်! မိတ်ဆွေသည် သင့်ဘာသာစကားဖြင့် အကူအညီ လိုပါက၊
ကျေးဇူးပြု၍ 1-800-250-8427 ကိုခေါ်ပါ။

Pažnja! Ako vam je potrebna pomoć na vašem jeziku, pozovite **1-800-250-8427**

توجه! اگر شما نیاز به کمک در زبان خود، لطفا با شماره تلفن 1-800-250-8427

Attention! Si vous avez besoin d'assistance dans votre langue, appelez le **1-800-250-8427**

Nurabe maso! Niba ukeneye ubufasha mu rurimi rwawe, wahamagara kuri **1-800-250-8427**

ध्यान! यदि तपाईंलाई आफ्नो भाषामा मद्दत चाहिन्छ भने, कृपया **1-800-250-8427** मा कल गर्नुहोस्

پاملرنه! که تاسو په خپله ژبه کې مرستې ته اړتیا لرئ،
مهرباني وکړئ **1-800-250-8427** ته زنګ ووهئ

Ogow! Haddii aad u baahan tahay in lagugu caawiyo luqaddada, fadlan wac **1-800-250-8427**

¡Atención! Si necesita ayuda en su idioma, por favor llame al **1-800-250-8427**

Muhimu! Kama wahitaji usaidizi kwa lugha yako, tafadhali piga simu **1-800-250-8427**

Uvaha! Yakshcho vam potribna dopomoha vashoyu movoyu, telefonuyte za nomerom **1-800-250-8427**

# Shaxda Tusmada


Ku soo dhawoow Barnaamijkaaga Farmashiyaha Vermont ..... 5
Barnaamijka Dadka reer Vermont oo Caafimaad qaba ..... 5
Barnaamijyada VPharm: VPharm 1, VPharm 2 iyo VPharm 3 ..... 5
Fahamka Medicare-kaaga PDP ..... 5
VPharm 1: Caymiska iyo Lacagta Joogtada ah ..... 6
VPharm 2: Caymiska iyo Lacagta Joogtada ah ..... 6
VPharm 3: Caymiska iyo Lacagta Joogtada ah ..... 6
Liiskaaga Daawada PDP ee Medicare ..... 7
Daawooyinka laga Reebay Medicare, Dawooyinka dukaanada laga-soo gadan karo (OTC) ..... 7
Lacag-la-bixin (ama kharash-wadaag) ..... 7
Kaarkaaga aqoonsiga ..... 7
Bixiyeyaasha ka Qaybqaadanaya ..... 8
Barnaamijyada Farmashiyaha ee dadka reer Vermont ee leh Medicare ..... 8
Barnaamijyada Kaydinta Medicare ..... 8
Ka Faa'iideystayaasha Medicare ee u qalma (QMB) ..... 8
Ka Faa'iideystayaasha Medicare ee Dakhliga-hooseeya ee cayiman hela (SLMB) ..... 8
Shakhsiyaadka u Qalma (QI-1) ..... 8
Bixinta Lacagta Joogtada ah ..... 8
Lacagaha Tooska ah ..... 8
Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga ..... 9
Barnaamijyada Kale ee reer Vermont loogu tala galay ..... 10
Dardaaran Nool iyo Dardaaran Hordhac ah ..... 10
Ku Deeqidda Xubnaha Jirka ..... 11
La wadaagidda Macluumaadka Adeeg bixiyahaaga ..... 11
Ogeysiiska Habdhaqanka Qarsoodiga Xogta ..... 11
Barnaamijka Hubinta Tayada ..... 11
Dhibaatooyinka iyo Cabashooyinka ..... 12
Marka Aanad ku Raacsanayn Ficil ..... 12
Racfaan ka Qaadashada Diidmada Medicare-kaaga PDP ..... 12
Racfaan ka Qaadashada Diidmada VPharm ..... 13
Dhegeysiga Cadaaladda ee Diidmada Racfaanka DVHA ..... 14
Sii wadidda Dheefaha ..... 15
Ashkatooyin ..... 15
Sababta Wanaagsan iyo Codsiga Dhibka ..... 16
Ma u Baahan tahay Caawin? ..... 16
Vermont Health Connect, Xarunta Taageerada Macaamiisha Green Mountain Care ..... 16
Ka Warbixinta Isbadalada ..... 16
Xafiiska u Doodaha Daryeelka Caafimaadka (HCA) ..... 17
Macluumaad Dheeraad ah ..... 17
Barnaamijyada Kale ee aan Farmashiyaha Ahayn ..... 17
Adeegyada Maalinta Dadka Waaweyn ..... 17

Barnaamijka Adeegyada Adeegaha ....................17
Adeegyada Isku-dhafan ee Carruurta (CIS) ....................17
Adeegyada Isku-dhafan ee Carruurta - Farogelinta Hore (CIS-EI) ....................18
Adeegyada Daryeelka Gaarka ah ee Carruurta (CPCS) ....................18
Rugaha Caafimaadka Carruurta leh Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah (CSHN) ....................18
Doorashooyinka Daryeelka ....................18
Adeegyada Naafada Korriinka ....................19
Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ....................19
Maalgelinta Qoyska ee Dabacsan ....................19
Daryeelka Kalkaalinta ee Tignoolajiyada Sare ....................19
Barnaamijka Daryeelka Guriga ee Tignoolajiyada Sare ee Carruurta ....................19
Adeegyada Dadka Guryaha Jooga ....................19
Rugaha Caafimaadka ee Gaarka ah ....................19
Adeegyada Gaarka ah ....................20
Barnaamijka Ogaanshaha iyo Faragelinta Maqalka Hore ee Vermont ....................20
Caafimaadka Maskaxda ....................20
Adeegyada Bukaan-socodka Dadka Waaweyn ....................20
Adeegyada Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoyska ....................21
Dhaqancelinta iyo Daaweynta Bulshada ....................21
Adeegyada Xaaladaha Degdegga ah ....................21
Barnaamijka Dhaawaca Maskaxda ....................21
Barnaamijka Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC) ....................21
Khayraadka Dheeraadka ah ee Bulshadaada ....................22
Khiyaanada, Qashinka, iyo Xadgudubka ....................22

Oktoobar 2024

## Ku soo dhawoow Barnaamijkaaga Farmashiyaha Vermont

Barnaamijyada farmashiyaha ee Vermont waxaa maamula Waaxda Helitaanka Caafimaadka ee Vermont. Halkan ayay ku qoran yihiin. Mid kastaa wuxuu leeyahay xeerar iyo faa'iidooyin u gaar ah.

**Buug-gacmeedkani ma bixinayo macluumaad ku saabsan dheefaha farmashiyaha ee Medicaid.** Ma leedahay Medicaid mana u baahan tahay macluumaadka ku saabsan dheefahaaga daawada? Ma garanaysaa barnaamijka aad ku jirto? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427.** Wac Isniinta ilaa Jimcaha, laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo (fasaxyada wuu xiran yahay).

### Barnaamijka Dadka reer Vermont oo Caafimaad qaba

Kani waa barnaamij bilaash ah oo loogu talagalay dadka reer Vermont ee aan haysan caymiska daawada dhakhtarku qoro. Waxay u ogolaataa inay ku iibsadaan daawooyinka caymiska kujira qiimo jaban. Ma leedahay adeegga Healthy Vermonters? Farmashiyahaagu wuxuu u soo gudbin karaa cabasho Waaxda Helitaanka Caafimaadka ee Vermont. Waaxdu lacag ma bixin doonto. Laakiin waxaad bixin doontaa qiimaha ugu hooseeya ee Medicaid, maaha qiimaha tafaariiqda farmashiyaha.

### Kaalmada Dakhliga-Hooseeya (LIS) ama "Caawimo Dheeraad ah"

Barnaamijkani waxa uu caawiyaa bixinta kharashka daawada dadka ku jira qorshaha daawada Medicare. Wuxuu bixiyaa lacag-bixinno bille ah, lacag-bixinnada sannadlaha ah, iyo qayb-bixinta daawooyinka. Kharashyada qaar laguma bixiyo qorshaha dawada ama Caawinta Dheeraadka ah. Green Mountain Care ayaa kaa caawin doona bixinta qaar ka mid ah kharashyadaas. Ma ku jirtaa Barnaamijka Kaydinta Medicare (Medicare Savings Program)? Markaa waxaanu kuu diiwaan gelin doonaa Caawinaad Dheeraad ah (Extra Help). **Dadka qaarkood waa inay codsadaan Caawinaad Dheeraad ah sannad kasta.**

**Ma doonaysaa inaad is-diiwaangeliso ama aad wax badan ka barato?** Ka wac xafiiska Barnaamijka Caawinta Caymiska Caafimaadka ee Gobolka **1-800-642-5119**. **AMA** wac xafiiska Sooshiyaal Sikiyuuritiga ama gal websaytka.

### Fahamka Qorshaha Dawooyinka ee Medicare-kaaga

Kani badanaa waa Qorshaha Dawooyinka Qaybta D ee Medicare. Waxa kale oo ay noqon kartaa qayb ka mid ah Qaybta C ee Medicare ama qorshaha "Medicare Advantage". Labadan waxaan ugu yeernaa Qorshaha Dawooyinka ee Medicare. Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid ayaa maamula barnaamijyadan. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka Qorshaha Dawooyinka ee Medicare:

1) Wac **1-800-633-4227** - TTY 1-877-486-2048
2) **AMA** aad websaytka Medicare.
3) **AMA** wac Barnaamijka Caawinta Caymiska Caafimaadka Gobolka **1-800-642-5119.** Waxay ku sugan yihiin Wakaaladda Deegaanka ee Khadka Caawinta Gabowga.

## Barnaamijyada VPharm: VPharm 1, VPharm 2 iyo VPharm 3

Barnaamijyada VPharm waxay caawiyaan dadka aan heli karin Medicaid laakiin haysta Medicare. Waxay bixinaysaa Qorshaha Dawooyinka ee Medicare iyo kharashyada la xidhiidha. Waxaad yeelan doontaa kharash-wadaag $1 ama $2, taasoo ku xidhan dawada. VPharm ayaa bixisa kharashka intiisa kale.

**VPharm waxa kale oo laga yaabaa inay kaa caawiso bixinta lacagta bilaha ah ee qorshahaaga dawada Medicare.**

VPharm waxay leedahay 3 heerar: VPharm 1, VPharm 2, iyo VPharm 3. Barnaamij kastaa wuxuu leeyahay xeerar iyo faa'iidooyin u gaar ah. Qorshahaaga daawada Medicare-ka ayaa bixinaya qaybtiisa dhammaan daawooyinkaaga. Waxaad bixinaysaa kharash-wadaagtaada. Markaa VPharm ayaa bixisa qaybteeda. Xubnuhu waa inay lahaadaan qorshaha dawada Medicare si ay u ilaashadaan VPharm. Qorshahaaga dawadu waa inuu ka shaqeeyaa Vermont. Waa inaad isticmaashaa bixiye Vermont Medicaid.

## Lacag-bixinaha Joogtada ah ee Billaha ah:

- **$15** ee VPharm 1
- **$20** ee VPharm 2
- **$50** ee VPharm 3

## VPharm1, VPharm 2 iyo VPharm 3 dhamaantood waxay bixiyaan:

- **Sahayda xanuunka macaanka**
- **Qayb ka mid ah qorshahaaga dawada lacag bixinta bishiiba ilaa kharash go'an**. Dawladda federaalku waxay go'aamisaa kharashka go'an sannad kasta Janaayo 1. Kaalmada Dakhliga Hoose (LIS) "Caawinta Dheeraadka ah" waxay sidoo kale bixisaa qayb ka mid ah lacag-bixinta bisha. Ma ku jirtaa qorshaha daawada Medicare ee la xoojiyay? Markaa VPharm waxa laga yaabaa in aanay bixin lacagta bisha oo dhan.
- **Qayb ka mid ah kharash-wadaagtaada, lacagaha lagaa jarayo iyo caymiska wada-jirka IYO faraqyada caymiska ee daawooyinka muddada gaaban iyo kuwa muddada dheer**. Kaalmada Dakhliga Hoose "Caawinta Dheeraadka ah" waxay sidoo kale bixisaa qayb ka mid ah kharashyadan.
- **Noocyo ka mid ah dawooyinka aan lagu daboolin qorshaha daawada**. Tani waa qaar ka mid ah dawooyinka aan dhakhtar laga qorin, fiitamiinnada iyo dawooyinka qufaca/qabowga.

## VPharm 1 sidoo kale waxay bixisaa:

- Hal **baaritaan indhaha ah** oo dhamaystiran iyo hal xilli dhexe ah 2-dii sanaba mar. Waa in uu sameeyo dhakhtarka muraayadaha indhaha ama dhakhtarka indhaha.

**Ma doonaysaa macluumaad dheeraad ah ama inaad iska diiwaangeliso VPharm 1, VPharm 2 ama VPharm 3?** Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**. Wac Isniinta ilaa Jimcaha, laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo Waxaan xirannahay fasaxyada.

## Liiska Daawooyinkaaga Qorshaha ku Jira

**Formulary** liis dawooyin ah. Si loo yareeyo kharashaadka, qorshahaaga daawadu waxa uu dhakhaatiirta u sheegaa inay qoraan daawooyinkan liiskan ku jira. Daawooyinka qaarkood, qorshahaaga dawadu waa inuu OGGOLAADO dawada ka hor inta aanad helin. Tan waxa loo yaqaan **oggolaansho hore**. La'aanteed, ma bixin doonaan kharashka daawada. Haddii qorshahaaga dawadu aanu ogolaan doonin daawada, racfaan ayaad qaadan kartaa. Fiiri qaybta "Markaad ku Raacsanayn Ficil."

## Medicare ma Bixin Doonto Kharashka Dawooyinka Qaarkood

Kuwaan waxaa loo yaqaan **Daawooyinka aan Kujirin Medicare**. Waxaa ka mid ah dawooyinka aanu dhakhtar qorin, qaar ka mid ah fiitamiinada iyo daawooyinka qufaca iyo duriga. Waaxda Helitaanka Caafimaadka ee Vermont waxay dabooshaa qaar ka mid ah dawooyinkan laakiin qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho hore. Dhakhtarkaagu wuxuu codsan karaa ogolaansho hore. Waa inay buuxiyaan foom oggolaansho hore oo ay soo diraan. Waxay foomka ka heli karaan [websaytka Medicare](websaytka Medicare).

VPharm waxa ay bixisaa kharashka **qaar ka mid ah** dawooyinka jeneriga ah. Waa kan [liiska oo dhameystiran](liiska oo dhameystiran).

Barnaamijyadeena **ma** daboolaan daawooyinka tijaabada ah sababtoo ah ma jirto wax caddaynaya inay shaqeeyaan. Sidoo kale ma daboolno dawooyinka aysan oggolaan Maamulka Dawooyinka ee Federaalka.

## Lacag-la-bixin ama Kharash-wadaag

VPharm, kharash-wadaagtaada dawo kasta waxay noqon doontaa $1 ama $2.

- Haddii uu gobolku bixiyo $29.99 ama ka yar dawada, kharash-wadaagtaadu waxay noqon doontaa $1.
- Haddii uu gobolku bixiyo $30 ama ka badan dawada, kharash-wadaagtaadu waxay noqon doontaa $2.

Maxaa dhacaya haddii lagu weydiiyo inaad bixiso wax ka badan $2? Weydii in farmashiistaha uu ku dalacsiiyay Green Mountain Care. Ama wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427** wixii caawimo ah.

## Kaarkaaga Aqoonsiga

Kaarkaaga Aqoonsiga Green Mountain Care waxaa boosta loogu soo diri doonaa gurigaaga. Fadlan tus marka aad tagto dukaanka daawada. Miyaadan ku helin kaadhkaaga aqoonsiga cusub bil gudaheed markaad heshay buug-gacmeedkan? **AMA** kaadhkaagii kaa lumay? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427** oo ka codso mid cusub.

Ma leedahay caymiska daawada dhakhtarku qoro ee Medicare? Kadib tus bixiyahaaga labada kaadh aqoonsi ee caymiska.

### Dhakhaatiirta iyo Bixiyeyaasha

Dhakhaatiirta kuu soo qorta warqadaha daawada adiga iyo farmashiyahaaga **waa inay** ka mid yihiin barnaamijyadayada. Dhakhaatiirta iyo farmashiyeyaasha intooda badan ee Vermont waa ka mid yihiin. Ma qabtaa su'aalo ku saabsan dhakhaatiirta iyo farmasiyaha? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427. AMA** aad websaytka oo dhagsii "Provider Look-up."

## Barnaamijyada Kaydinta Medicare

Kuwani waa barnaamijyo dadka ka caawiya inay iska bixiyaan kharashka Medicare Qaybta A iyo Qaybta B. Qaar ka mid ah xubnaha VPharm ee dakhligoodu hooseeyo ayaa laga yaabaa inay helaan caawimo bixinta dhammaan kharashyada. Ma doonaysaa in labada Medicare iyo Medicaid ay kaa caawiyaan bixinta kharashka? Markaa dhakhaatiirtaada/bixiyeyaashaadu waa inay ka mid noqdaan labada barnaamijyada Medicare iyo Medicaid. Barnaamijyadu waa:

- **Ka-faa'iideystayaasha Medicare ee u Qalma (QMB)** - Waxay bixisaa lacagaha Medicare Qaybaha A iyo B bishiiba, lacagaha laga jarayo, caymiska la wadaago, iyo kharash-wadaagta
- **Ka-faa'iideystayaasha Medicare ee Dakhliga-Hooseeya ee cayiman (SLMB)** - Waxa ay bixisaa lacagaha Medicare Qaybta B bishiiba oo kaliya
- **Shakhsiyaadka u Qalma (QI-1)** - Waxay bixisaa Medicare Qaybta B bishii oo kaliya

**Ma bixinaysid lacag bixin bille ah Barnaamijyada Kaydinta Medicare.** Warqadda ku saabsan caymiskaaga VPharm ayaa lagu sheegay haddii aad heli karto caawimadan. Maxaa dhacaya haddii aadan haysan Barnaamijka Kaydinta Medicare laakiin aad u malaynayso inaad tahay? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**.

## Bixi Lacag-bixintaada Bishii ee VPharm

Bixi isla marka aad hesho biilka ugu horreeya. Haddii aad sameyso, caymisku wuxuu bilaaban karaa kowda bisha soo socota. Waa inaad sii wadato lacag bixinta wakhtiga loogu talagalay. Sidaas ma lumin doontid ama ma yeelan doontid faraqa caymiskaaga. Xubnaha Barnaamijka Dadka reer Vermont ee Caafimaadka qaba **ma** laha lacag-bixin bille ah. Laakiin dhammaan barnaamijyada kale ee farmashiyaha waa leeyihiin.

Maxaa dhacaya haddii aad lumiso biilkaaga? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427.** Waxay kuu sheegi karaan inta lagugu leeyahay iyo sida loo bixiyo.

### Waxaad dejin kartaa Lacag-bixin toos ah

Markaa kama werweraysid inaad biilkaaga bixinayso bil kasta. Lacag bixintaada waxaa lagaa saarayaa koontada jeeggaga ama kaydinta bil kasta.

Wax su'aalo ah ma ka qabtaa lacagtaada joogtada ah ee caymiska ee bishii? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427.** Waxay kaloo kuu sheegi karaan dejinta lacag-bixinno toos ah.

# Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

**Waxaad xaq u leedahay in:**

- Si edeb leh laguula dhaqmo.
- Si taxadar leh laguu daaweeyo.
- Aad doorato oo beddesho dhakhtarkaaga/bixiyeyaashaada.
- Aad hesho xaqiiqooyin ku saabsan adeegyada barnaamijkaaga iyo dhakhtarka/bixiyeyaasha.
- Caafimaadkaaga laguugu sheego erayo aad fahmi karto.
- Go'aan aad ka gaadho daryeelkaaga caafimaad, su'aalahaaga ha laga jawaabo, oo diido daawaynta.
- Aad weydiisato oo aad hesho nuqul ka mid ah diiwaannadaada caafimaadka. Waxaad waydiisan kartaa isbeddelo haddii macluumaadku khaldan yahay.
- Aad ka hesho ra'yi labaad dhakhtar/bixiye kale oo ka diiwaangashan Vermont Medicaid.
- Aad ka hadasho barnaamijkaaga ama welwelkaaga daryeelka caafimaadka.
- Aan hoos laguu dhigin ama aan cidla lagugu hayn sababtoo ah cagajugleyn, ciqaab, ama sababtoo ah way fududahay.
- Aad weydiisato racfaan haddii laguu diido adeegyada aad u malaynayso inaad u baahan tahay. Eeg bogga 12 wixii macluumaad dheeraad ah.

## Ka taxadar caafimaadkaaga adigoo:

- U sheegaya dhakhtarkaaga calaamadaha jirradaada iyo taariikhda caafimaadkaaga.
- Weydiinaya su'aalaha marka aad u baahan tahay inaad wax badan ka ogaato ama aadan fahmin wax.
- Raacaya qorshayaasha daawaynta adiga iyo dhakhtarkaagu aad isla ogolataan.
- Ilaalinaya ballamahaaga ama horay u soo wacaya si aad u joojiso haddii aadan awoodin oofinteeda.
- Baranaya xeerarka barnaamijkaaga si aad ugu isticmaasho adeegyada sida ugu fiican ee aad awooddo.
- Hubinaya inaad ka hesho gudbinta loo baahan yahay dhakhtarkaaga ka hor inta aanad arkin dhakhaatiir kale.
- Bixinaya lacagaha joogtada ah iyo kharash-wadaagta marka loo baahdo.

# Barnaamijyada Kale ee reer Vermont loogu tala galay

## Dardaaran Nool iyo Dardaaran Hordhac ah

**Dardaaran nooli** waa diiwaan qoran. Wuxuu leeyahay:

- Cidda kuu samayn karta go'aannada caafimaadka haddii aadan awoodin
- Inta qofku go'aansan karo
- Waa kee dhakhtarkaaga/bixiyaha daryeelka aasaasiga ah
- Waa maxay daryeelka caafimaadka iyo ama daaweynta aad rabto
- Sida aad u rabto in arrimaha gaarka ah loo maareeyo, sida aaskaaga
- Cidda aad rabto in uu noqdo wakiilkaaga, haddii loo baahdo
- Cidda aadan **rabin** inuu go'aano kuu gaaro
- Waa maxay nooca daryeelka aad rabto haddii aad dhimanayso

Dardaaran noloshu waa bilaash. Waxa kale oo loogu yeeraa dardaaran horudhac ah ama awoodda qareenka ee joogtada ah ee daryeelka caafimaadka. Waxa laga yaabaa in loogu yeedho dukumeentiga daryeelka dhamaadka nolosha. Sharciga Vermont ee ku saabsan dardaaranka nolosha waa sharciga Dardaaranka Hordhaca ah ee Vermont (Title 18, Cutubka 231).

Waxaa laga yaabaa inaad aad u xanuunsan tahay oo aadan qaadan karin go'aannada daryeelka caafimaadka. Haddii aysan **ahayn** xaalad degdeg ah, dhakhaatiirtu kuma siin karaan daryeel isla markiiba. Waa inay marka hore ogaadaan inaad leedahay dardaaran nololeed iyo in kale. Haddii aad leedahay, waa inay u hogaansamaan tilmaamaha dardaaranka nolosha. **AMA** u hogaansamaan tilmaamaha qofka aad dooratay inuu kuu qaato go'aannada caafimaadka.

Dhakhtarku ma diidi karaa inuu raaco tilmaamaha ku qoran dardaarankaaga hordhaca ah? Haa, haddii ay aaminsan yihiin inuu khalad yahay. **LAAKIIN** waa inay:

- U sheegaan adiga iyo qofka aad u magacawday inuu go'aan kuu gaaro;
- Ka caawi u wareejinta daryeelkaaga dhakhtar kale kaas oo adeeci doona tilmaamaha;
- Sii wadaan inay ku siiyaan daryeel caafimaad ilaa laga helayo dhakhtar cusub; iyo
- Ku sharaxaan diiwaankaaga caafimaad:
  - dhibka
  - Tallaabooyinka la qaaday si wax looga qabto iyo
  - sida dhibka loo xaliyay.

Bixiye kasta oo daryeel caafimaad waa inuu u hoggaansamo sharciga dardaaranka nolosha. Waa inay lahaadaan xeerar u gaar ah si ay u hubiyaan in sharciga iyo qawaaniinta la raacay.

Ma u malaynaysaa in qof aanu raacayn sharciga? Ka wac Qaybta Shatiga iyo Ilaalinta **1-800-564-1612. AMA** aad websaytka Qaybta Shatiga iyo Ilaalinta si aad u xarayso cabasho. **AMA** warqad u dir:

Division of Licensing and Protection
103 South Main Street, Ladd Hall
Waterbury, VT 05671

Ma rabtaa macluumaad ku saabsan sharciga gobolka iyo dardaaranka nolosha? Ka wac Shabakadda Anshaxa ee Vermont **1-802-828-2909. AMA** gal websaytkooda **vtethicsnetwork.org**. Waxay kaloo wataan foomam ay ku sameeyaan dardaaran nololeed.

Title 18 waa sharciga Vermont ee dardaaranka nolosha. Waxaad ka arki kartaa onlayn. Ma rabtaa inaad wax badan ka ogaato? La hadal dhakhtarkaaga ama wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**.

## Ku Deeqidda Xubnaha Jirka

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad ku deeqdo xubnahaaga markaad dhimato. Hal deeq bixiye ayaa caawin kara dad badan. Si aad wax badan u barato, wac **1-888-275-4772** wixii macluumaad bilaash ah. Ama booqo websaytka wixii macluumaad bilaash ah.

### La Wadaagidda Macluumaadka Dhakhtarkaaga/Bixiyahaaga

Waxaan rabnaa inaan ka caawino dhakhtarkaaga inuu hubiyo inaad hesho daryeelka caafimaadka aad u baahan tahay. Waxaa laga yaabaa inaan siino liiska daawooyinka aad qaadanayso. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad hubiso inaad hesho daawooyin si fiican idiinku wada shaqeeya.

## Ogeysiiska Habdhaqanka Qarsoodiga Xogta

Waxaad heshay warqad sheegaya inaad buuxisay xeerarka barnaamijyadeena. Waxa kale oo ay lahayd nuqul ka mid ah **Ogeysiiska Habdhaqanka Qarsoodiga Xogta.** Sharciga federaalka, ee loo yaqaan HIPAA, wuxuu leeyahay waa inaan ku siinaa ogeysiiska. Ogeysiiska ayaa kuu sheegaya xuquuqdaada asturnaanta. Waxay sheegaysaa sida macluumaadkaaga caafimaad loo isticmaali karo ama loo wadaagi karo. Ma u baahan tahay nuqul kale oo ogeysiiska ah? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427** oo weydii. **AMA** waxaad ka arki kartaa onlayn.

## Barnaamijka Hubinta Tayada

Kani waa barnaamij lagu hubinayo inaad hesho daryeel caafimaad oo tayo leh iyo adeeg wanaagsan. Waxyaabaha aan eegno si aan u hubinno waxaa ka mid ah:

- Intee in le'eg oo daawo ah ayay bukaannadu isticmaalaan;
- Immisa xubnood ayaa hela daryeel joogto ah si ay uga hortagaan jirrooyinka;
- Immisa xubnood ayaa adeegsada qolka xaaladda degdegga ah marka **aanay** ahayn xaalad degdeg ah;
- Sida bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka jireed iyo maskaxdu u wada shaqeeyaan;
- Sidee xubnaha iyo bixiyeyaasha ugu faraxsan yihiin barnaamijyadayada.

Waxaan ka codsanaynaa dhakhaatiirta inay raacaan habraacyadayada hab-dhaqanka ugu wanaagsan ee cudurrada daba-dheeraada qaarkood. Tani waxay kuu ilaalin kartaa caafimaadkaaga.

Ma jiraan siyaabo aan ku horumarin karno barnaamijyadeena oo aan uga dhigi karno shaqadaada mid kuu fiican? Wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**. Faallooyinkaagu waxay qayb ka noqon doonaan dib u eegista tayadayada.

### Dhibaatooyinka iyo Cabashooyinka

Dhibaato ma kaa haysataa helista daawadaada? Mise cabasho ayaad qabtaa? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**. Haddii dhibkaaga aan la xalin, racfaan ayaad ka qaadan kartaa. Wax badan oo ku saabsan racfaanka ka ogow bogga 14.

## Marka Aadan ku Raacsanayn Go'aanka ku Saabsan Dawooyinkaaga

Qorshahaaga dawada ayaa gaari doona go'aannada ugu badan. Wac lambarka adeegga macaamiisha ee ku yaal dhabarka kaarkaaga aqoonsiga. Waxay kuu sheegi doonaan sida racfaan loo qaato haddii aad khilaafto. Hoos waxaa ku yaal sida racfaanku u shaqeeyo marka aad leedahay qorshe caymis daawo iyo VPharm.



### Diidmada Racfaanka ee Qorshahaaga Dawada

**Ma waydiisatay ogolaansho hore daawada? Qorshahaaga daawadu ma diiday inuu bixiyo kharashka?** Waxaad waydiisan kartaa VPharm inay bixiso kharashka. **LAAKIIN** marka hore waa inaad raacdaa dhammaan xeerarka racfaanka ee qorshahaaga daawada. Waxaa jira dhowr tillaabo. Waxaad u baahan tahay inaad racfaan ka qaadato tallaabo kasta oo ay ku jirto tallaabada **Hay'adda Dib-u-eegista Madax-bannaan** . Maxaa dhacaya haddii Hay'adda Dib-u-eegista Madaxa-bannaan ay sheegto in qorshaha daawadu aanu bixinayn kharashka? Dabadeed dhakhtarkaaga kuu qoraya daawada ayaa laga yaabaa inuu u sheego VPharm inay bixiso kharashka. Waa inay siiyaan VPharm nuqul ah go'aanka Hay'adda Dib-u-eegista Madax-bannaan.

**Qorshahaaga daawadu miyuusan bixin kharashka daawadaada sababtoo ah "ma caynsana?"** Hadday sidaas tahay, markaa **uma baahnid** inaad racfaan ka qaadato. Dhakhtarkaaga ayaa u baahan doona inuu waydiisto VPharm inay bixiso kharashka. Waa inay siiyaan VPharm nuqul ah warqadda sheegaysa in daawadu aanay caynsanayn.

**VPharm waxay kuu soo diri doontaa ogeysiis qoraal ah adiga iyo dhakhtarkaaga. Waxay sheegi doontaa waxay go'aansadeen.** Maxaa dhacaya haddii VPharm uu go'aansado inuu diido, xaddido, yareeyo, ama joojiyo faa'iido? Tan waxa loo yaqaan "go'aaminta faa'iidada xun."

Waxa kale oo aad waydiisan kartaa inay eegaan go'aankaas mar kale. Tan waxaa lagu magacaabaa racfaan gudaha ah. Sii wad akhriska si aad wax badan u ogaato.

## Ma u Malaynaysaa in Go'aanka VPharm uu Khaldan yahay?

### Codso Racfaan Gudaha ah

Waaxda Helitaanka Caafimaadka Vermont waxa kale oo loo yaqaan DVHA. Racfaan gudaha ah ayaa waydiisanaya DVHA inay dib u eegto go'aanka VPharm uu gaadhay. Qof aan ka mid ahayn go'aanka koowaad ayaa eegi doona kiiskaaga. Waxay kuu sheegi doonaan waxay go'aansadaan. Tan waxaa lagu magacaabaa racfaan gudaha ah. Inta badan, waa inaad tan samaysaa ka hor intaadan codsan Dhagaysi Caddaalad oo Gobol.

Waxaad haysataa **60 maalmood** oo aad racfaan ku qaadato. 60ka maalmood waxay bilaabanayaan taariikhda ay DVHA kuugu soo dirtay ogeysiiska go'aanka. Bixiyahaagu waxa laga yaabaa inuu codsato racfaanka haddii aad siiso ogolaansho qoraal ah. Waxaad racfaan ku qaadan kartaa qoraal ama telefoon.

**Waxaa jira 3 siyaabood oo aad ku codsan karto racfaan gudaha ah:**

1. **Ka wac** Xarunta Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427.** TDD/TTY: 1-888-834-7898
2. Onlayn: https://dvha.vermont.gov/members/appeals-and-fair-hearings/members AMA Iimayl.
3. **Warqad u** dir:

Department of Vermont Health Access
Health Care Appeals Team
150 Pilgrim Park – 3rd Floor
Waterbury, VT 05671-4030

**Miyaanu jarnay ama joojinay faa'iidooyinka farmasiyaha ee aad hore u heli jirtay?** Waad sii wadan kartaa inta lagu jiro racfaankaaga **haddii aad waydiisato**. Waa inaad tan codsatid ka hor inta uusan isbeddelku bilaaban. Waa maxay habka ugu wanaagsan ee aad ku sii wadi karto helitaanka adeegyadaada? Ka wac Adeegyada Macmiilka **1-800-250-8427**.

**Maxaa ka dhacaya racfaan gudaha ah?** DVHA waxay dejin doontaa kulan ay mar kale ku eegi doonto go'aankeeda. Waa inaad ka qaybqaadataa kulankan. Adiga ayaa iska hadli kara ama waxaad la imaan kartaa qof kuu hadla. Bixiyahaaga ayaa ku hadli kara ama siin kara macluumaadka DVHA. **Ma u baahan tahay caawin?** Waxaa laga yaabaa inaad hesho talo sharci oo bilaash ah. Ka wac Xafiiska Kaalmada Sharciga ee U doodaha Caafimaadka **1-800-917-7787.** Ama gal websaytka Kaalmada Sharciga ee internetka.

**DVHA waa in ay go'aan ka gaarto racfaankaaga 30 maalmood gudahood.** Maxaa dhacaya haddii aad codsato waqti dheeraad ah? Maxaa dhacaya haddii sugitaanka waqti dheer ay ku caawin karto? Tusaalooyin: Dhakhtarkaagu wuxuu u baahan yahay wakhti dheeraad ah si uu u soo diro macluumaadka. Ama ma aadi kartid shir wakhtigaas. Markaa waxay qaadan kartaa 14 maalmood oo kale . Go'aanka muddada ugu dheer wuxuu qaataa **44 maalmood**.

**Ma u baahan tahay DVHA ay racfaankaaga dhaqso u go'aamiso?** Noo sheeg haddii sugiddu ay si xun u dhaawacayso caafimaadkaaga ama noloshaada. DVHA waxay eegi doontaa haddii aad buuxisay shuruudaha xeerarka racfaanka degdegga ah (degdegga ah). Haddii aad

buuxisay, waxaad go'aan ku heli doontaa **72 saacadood gudahood**. Waxay qaadan kartaa waqti dheer haddii aad tan codsato ama way ku caawin kartaa. Racfaanka degdegga ah ee ugu dheer wuxuu qaadan karaa **17 maalmood**.

## Miyaadan ku Raacsanayn Go'aanka Racfaanka Gudaha?

Waxaad codsan kartaa Dhegeysi Caddaalad oo Gobol. Sarkaal dhegeysi oo ka tirsan Guddiga Adeegyada Aadanaha ayaa dhegeysan doona kiiskaaga. Waxay go'aansadaan inay DVHA samaysay go'aanka saxda ah.

Inta badan, racfaanka gudaha waa in marka hore la dhammeeyaa. Markaa waxaad codsan kartaa Dhegeysi Caddaalad oo Gobol. Maxaa dhacaya haddii DVHA aysan go'aan ka gaarin racfaankaaga gudaha ugu dambeyn? Markaa waxaad codsan kartaa Dhegeysi Cadaalad oo Gobol adoon sugin go'aan.

Waxaad haysataa **120 maalmood** oo aad ku codsato Dhegeysi Cadaalad oo Gobol. Goorma ayay 120ka maalmood bilaabmaan? Taariikhda ku qoran warqadda ayaa kuu sheegaysa go'aanka racfaanka gudaha.

**Waxaa jira 3 siyaabood oo lagu waydiisan karo Dhegeysiga Cadaalad oo Gobol:**

1. **Ka wac** Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427.** Ama si toos ah uga wac Guddiga Adeegyada Aadanaha **802-828-2536**
2. **AMA warqad u** dir:

   Human Services Board
   6 Baldwin St., Suite 305
   Montpelier, VT 05633-4301

**AMA Online**

**Miyaanu jarnay ama joojinay faa'iidooyinka farmasiyaha ee aad hore u heli jirtay?** Waxaad sii haysan kartaa faa'idooyinkaaga inta lagu jiro Dhegeysiga Cadaaladda ee Gobolka. Waa inaad tan ku codsataa **11 maalmood gudahood**. 11ka maalmood ayaa bilaabmaya maalinta ay DVHA kuu soo dirtay go'aankeeda racfaanka. Si aad u sii hesho dheefahaaga, wac Adeegyada Macmiilka **1-800-250-8427**.

**Maxaa dhacaya marka aad codsato Dhageysi Cadaalad oo Gobol?** Waxaad warqad ka heli doontaa Guddiga Adeegyada Aadanaha. Sarkaalka dhegeysiga waa qofka go'aamin doona kiiskaaga. Waxay qaban doonaan shir ay ku maqlaan dhinacaaga. Waxay go'aamin doonaan haddii DVHA ay khalad samaysay. Waxaad u baahan tahay inaad ka qayb qaadato kulankan. Adiga ayaa iska hadli kara ama waxaad la imaan kartaa qof kuu hadla. Dhakhtarkaaga/bixiyahaaga ayaa ku hadli kara ama siin kara macluumaadka sarkaalka maqalka.

**Ma u baahan tahay caawin?** Waxa laga yaabaa inaad caawimo **bilaash ah** ka hesho Vermont Legal Aid. Ka wac Xafiiska u Doodaha Daryeelka Caafimaadka **1-800-917-7787. AMA** aad websaytkooda.

**Intee in le'eg ayay qaadanaysaa in go'aan laga gaaro Dhegeysiga Cadaaladda ee Gobolka?** Guddiga Adeegyada Aadanaha waa in uu kiiskaaga go'aan ka **gaaro 90 maalmood gudahood.** 90ka maalmood waxa ay bilaabanayaan taariikhda aad marka hore codsatay racfaan gudaha ah.

**Ma u baahan tahay go'aan degdeg ah?** Noo sheeg haddii sugiddu ay si xun u dhaawacayso caafimaadkaaga ama noloshaada. Ma buuxisay xeerarka Dhegeysi Cadaalad oo Gobol oo degdegga ah? Markaa waxaad go'aan ku heli doontaa **3 maalmood oo shaqo gudahood**.

### Haysashada Faa'iidooyinka Farmashiyaha Inta aad Racfaan ka Qaadanayso – Waxyaabaha kale ee aad u baahan tahay inaad ogaato

- Adigu ma iska bixisay faa'iidooyinka? Haddii aad **ku guuleysato** racfaanka ama dhegeysiga, waxaa laga yaabaa in farmashiyahaagu kuu soo celiyo lacagta. Bal na weydii sida.
- Gobolku ma bixiyay kharashka faa'idooyinka inta lagu jiro racfaanka? Haddii aad **lumiso**, waxaa laga yaabaa inaad dib u bixiso.
- Ma waxaad codsanaysaa racfaan ama dhegeysi? Isla mar ahaantaana, waxaad codsan kartaa inaad hayso adeegyada ilaa ay ka dhammaato.
- Racfaankaaga ama dhegeysigaagu ma adeeg dhammaaday ama la jaray baa? Miyay u dhammaatay ama la jaray sababtoo ah isbeddelka sharciga federaalka ama gobolka? Hadday sidaas tahay, **ma sii haysan kartid** adeegga inta lagu jiro racfaanka ama dhegeysiga.
- Dhegeysiga dacwadu ma ku saabsan yahay lacagtaada caymiska ah ee joogttada ah ee bishii? Waa inaad bixisaa maalinta ugu dambaysa haddii kale caymiskaagu wuu dhammaan doonaa. Haddii aad **ku guulaysato** dhegeysiga, dib ayaa lagu siin doonaa haddii aad ka badan tahay lacagta.

## Ashkatooyin

Miyaadan ku faraxsanayn meesha ama goorta aad u baahan tahay inaad u tagto adeegyada? Ma kula tahay in adeegyadaagu aanay ku filnayn? Wax dhibaato ah ma laguu geystay ka dib markii aad xuquuqdaada isticmaashay? Miyaan si sax ah laguula dhaqmin? Waqti aad u dheer ma ku qaadanaysaa inaad ballan hesho? Waxaad xereyn kartaa cabasho la yiraahdo **ashkato** wakhti kasta. Qof aan ka mid ahayn waxa kugu dhacay ayaa eegi doona ashkatadaada. Waxaad heli doontaa warqad ku saabsan waxa ay heleen **90 maalmood gudahood**.

**Waxaa jira 2 siyaabood oo ashkato loo gudbiyo:**

1. **Ka wac** Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**.
2. **AMA warqad u** dir:

   Department of Vermont Health Access
   Health Care Appeals Team
   150 Pilgrim Park – 3rd Floor
   Waterbury, VT 05671-4030

Maxaa dhacaya haddii aadan ku faraxsanayn go'aanka ashkatada? Waxaad codsan kartaa Dib-u-eegis Ashkatada. Qof kale ayaa eegi doona Ashkatadaada oo hubin doona in xeerarka la raacay. Waxaad heli doontaa warqad ay ku qoran tahay natiijada dib u eegista.

Adiga iyo dhakhtarkaaga laguma ciqaabi karo xaraynta racfaan ama ashkato. Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta racfaan ama ashkato? Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa xubin qoyska ka mid ah, saaxiib ama qof kale inuu ku caawiyo. Waa inaad u sheegtaa Gobolka inaad doonayso in qofkani kuu hadlo. Na soo wac haddii aad u baahan tahay caawimaad tallaabooyinkan. Waxaad sidoo kale wici kartaa Xafiiska u doodaha Daryeelka Caafimaadka (Health Care Advocate) **1-800-917-7787**. **AMA** aad websaytkooda.

## Sababta Wanaagsan iyo Codsiga Dhibka

Ma ku jirtaa VPharm? Dhibaato ma ku qabtaa in aad iska diiwaan geliso qorshe cusub oo daawo ama helidda caymis? Wac qorshaha caymiska ee daawada ama u sheeg qof inuu kuu soo waco. Samee wax kasta oo aad awoodid si aad u xalliso dhibaatada. Maxaa dhacaya haddii taasi shaqayn waydo? Si xun miyay wax kuu yeeli doontaa haddii aadan qaadan daawadaada? Kadibna u soo dir Sababta Wanaagsan iyo Codsiga Dhibka. Si tan loo sameeyo, wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**. Waxay kaa caawin karaan inaad hesho daawadaada ilaa dhibaatada la xaliyo.

# Ma u Baahan tahay Caawin?

## Taageerada Macmiilka

Taageerada Macmiilku waxay u jirtaa inay ku caawiso. Waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan barnaamijkaaga. Way ku caawin karaan haddii ay dhibaato kaa haysato helitaanka daryeel caafimaad. Ka wac Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427.**

Taageerada macmiilku waxay furan tahay 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo Isniin ilaa Jimce. Waxaan xirannahay fasaxyada.

## Ka warbixinta Isbadalada

Waa **inaad** ku soo wargelisaa isbeddeladan **10 maalmood gudahooda** ee isbeddelka:

- Isbeddelka dakhligaaga ama qoyskaaga
- Isbeddelka ciwaanka
- Dhalidda ama korsashada carruurta
- Dhimashada
- Helitaanka caymis caafimaad oo kale

### Xafiiska u Doodaha Daryeelka Caafimaadka

Waxay kaa caawinayaan dhibaatooyinka ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga ama faa'iidooyinka. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan Cabashada, Racfaanka iyo Dhegeysiga Cadaaladda. Ka wac **1-800-917-7787**. **AMA** aad websaytkooda.

### Macluumaad Dheeraad ah

Waxaan ku faraxsanahay inaan u sheegno xubnaha barnaamijyadayada, adeegyadayada, iyo bixiyayaashayada. Buug-gacmeedkan ka sokow, waxaad sidoo kale heli kartaa:

- Liiska bixiyeyaasha deegaankaaga ee qayb ka ah barnaamijyadayada
- Xeerarka barnaamijka
- Sida aanu u qorshaynayno inaanu ka dhigno adeegyadeena
- Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada aanu daboolno

Waxa kale oo aad wax badan ka heli kartaa shabakada.

## Barnaamijyo Kale

Waxaa jira barnaamijyo iyo adeegyo kale oo loogu talagalay carruurta, dadka waaweyn, iyo qoysaska. Barnaamijyada qaar ayaa ku siin doona gaadiid ku geeya adeegyadooda. Wax badan ka ogow adigoo wacaya Taageerada Macmiilka **1-800-250-8427**. Waa inaad buuxisaa shuruudaha xeerar badan si aad u hesho barnaamijyada qaarkood. Su'aalo ma qabtaa ama ma rabtaa inaad ogaato haddii aad buuxisay shuruudaha xeerarka? Wac barnaamijka aad rabto. Magacyadooda iyo tiradooda waa xagga hoose.

### Adeegyada Maalinta Dadka Waaweyn

Adeegyada Maalinta Dadka Waaweyn waxay ka caawiyaan dadka waayeelka ah iyo dadka waaweyn ee naafada ah inay joogaan guryahooda. Adeegyada Maalinta Dadka Waaweyn waxaa lagu qabtaa xarumaha maalintii. Waa meel nabdoon oo ay dadku ka heli karaan adeegyada caafimaadka iyo bulshada. Ka wac Qaybta Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan **802-241-2401. AMA** aad **websaytkooda**.

### Barnaamijka Adeegyada Adeegaha

Barnaamijkani waxa uu caawiyaa dadka waaweyn ee naafada ah kuwaas oo u baahan gargaar jireed hawl maalmeedka. Waxaad shaqaaleysiisaa, tababartaa, kormeertaa, oo aad jadwal u samaysaa adeegayaasha daryeelkaaga gaarka ah. Ka wac Qaybta Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan **802-241-2401. AMA** aad **websaytkooda**.

### Adeegyada Isku-dhafan ee Carruurta (CIS)

Tani waxay caawisaa haweenka uurka leh ama hadda ilmo dhalay. Waxay kaloo caawisaa qoysaska carruurta leh laga bilaabo dhalashada ilaa da'da lix jirka. Waxay ka caawiyaan:

- shaqada bulshada iyo taageerada qoyska;

- caafimaadka iyo xannaanaynta hooyada/dhallaanka;
- koritaanka ilmaha iyo caawinta carruurta dhalashada ilaa 3 ee dib u dhaca qaba;
- caruurnimada hore iyo caafimaadka maskaxda qoyska;
- daryeelka ilmaha; iyo
- waxyaabo kale sida cunista saxda ah, dhibaatooyinka hadalka iyo luqadda

Ka wac Waaxda Carruurta iyo Qoysaska Qaybta Koritaanka Ilmaha **802-241-3110** ama **1-800-649-2642. AMA** aad **websaytkooda.**

### Adeegyada Isku-dhafan ee Carruurta - Farogelinta Hore (CIS-EI)
Barnaamijkan waxaa loogu talagalay carruurta da'doodu ka yar tahay 3 jir ee qaba naafo. **AMA** carruurta ka dambeeya dadka kale ee da'dooda. Waxay caawisaa dhallaanka, socod-baradka iyo qoysaska. Ka wac Shabakadda Qoyska Vermont **1-800-800-4005**.

### Adeegyada Daryeelka Gaarka ah ee Carruurta
Daryeelka Gaarka ah ee Carruurta waa adeeg Medicaid oo loogu talagalay dadka ka yar 21 sano. Waa inay leeyihiin naafo ama dhibaato caafimaad oo wakhti dheer ah oo halis ah. Waa inay ka ilaalisaa inay sameeyaan waxyaalaha ay tahay inay dadka da'dooda ahi sameeyaan. Waa inay ka ilaalisaa inay sameeyaan dhaqdhaqaaqyo nolol maalmeedka, sida cunista, labiska, inay keligood tagaan musqusha. Barnaamijku waxa uu ka caawinayaa daryeelka gaarka ah ee ilmaha. Wac **1-800-660-4427** ama **802-863-7338. AMA** aadwebsaytkooda.

### Rugaha Caafimaadka Carruurta leh Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah (CSHN)
Barnaamijkani waxa uu leeyahay rugo caafimaad waxana uu caawiyaa diyaarinta daryeelka carruurta leh baahiyaha caafimaad ee gaarka ah. Waxay ka caawiyaan qaar ka mid ah kharashyada daryeelka caafimaadka ee aanay daboolin caymis caafimaad ama Dr. Dynasaur. Wac **1-800-660-4427** ama **802-863-7338, AMA** aad websaytkooda.

### Doorashooyinka Daryeelka
Kani waa barnaamij daryeel oo wakhti dheer ah. Waxa uu bixiyaa kharashka daryeelka iyo taageerada dadka waayeelka ah ee reer Vermont iyo dadka naafada ah. Barnaamijku wuxuu dadka ka caawiyaa hawlaha maalinlaha ah. Waxay ku noolaan karaan guriga, guryo daryeel oo la xoojiyey, ama guriga dadka lagu xanaaneeyo. Bixiyeyaashu waa:
- Xarumaha Maalinta Dadka Waaweyn
- Wakaaladaha Deegaanka ee Gabowga
- Degganeyaasha Nolosha laga Caawiyo
- Wakaaladaha Caafimaadka Guriga
- Xarumaha Xannaanaynta
- Guryaha Daryeelka Deganaanshaha

Wac **802-241-0294**. **AMA** aad websaytkooda.

### Adeegyada Naafada Korriinka
Waxay caawiyaan dadka da' kasta oo leh naafo korriin. Waxay ka caawiyaan inay guriga kula noolaadaan qoysaskooda. Adeegyada waxaa ka mid ah maareynta kiisaska, adeegyada shaqada, taageerada bulshada, iyo nasinta. Nasinta waxay bixisaa daryeel kolka qoysasku ay

qaataan nasasho gaaban. Ka wac Waaxda Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan **802-241-0304. AMA** aad websaytkooda.

### Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale

Waxay ka caawiyaan qoysaska inay bixiyaan kharashka daryeelka caafimaadka ilmahooda ee aanu caymisku daboolin. Adeegyada waa in ay qoreen ama ay ansixiyeen rugaha caafimaadka Baahida Caafimaadka Gaarka ah ee Carruurta. Ka wac Waaxda Caafimaadka ee Vermont **1-800-660-4427** ama **802-863-7338. AMA** aad websaytkooda.

### Maalgelinta Qoyska ee Dabacsan

Tan waxaa loogu talagalay dadka da' kasta leh ee qaba naafo korriin oo qoys la nool. **AMA** qoysaska la nool oo taageera xubin qoys oo leh naafo korriin. Qoysasku waxay go'aansadaan adeegyada ay lacagtu bixinayso. Ka wac Waaxda Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan, Qaybta Adeegyada Korriinka **802-241-0304. AMA** aad websaytkooda.

### Daryeelka Kalkaalinta ee Tignoolajiyada Sare

Kani waa barnaamij xanaanayn guri oo degdeg ah. Waxaa loogu talagalay dadka u baahan tignoolajiyada inay noolaadaan ama qaba baahiyo caafimaad oo adag. Barnaamijku waxa uu dadka ka caawiyaa in ay ka baxaan isbitaal ama xarunta oo aadaan gurigooda. Dadka **ka weyn da'da 21**, wac Waaxda Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan **802-241-0294. AMA** aad websaytkooda.

Dadka **da'doodu ka yar tahay 21**, wac Barnaamijka Daryeelka Guriga ee Tignoolajiyada Sare ee Carruurta. Wac **1-800-660-4427** ama **802-863-7338. AMA** aad websaytkooda.

### Adeegyada Dadka Guryaha Jooga

Tani waxay caawisaa dadka da'doodu tahay 18 iyo ka weyn ee naafada ah. Waa inay u baahan yihiin in laga caawiyo baahiyaha gaarka ah ama hawlaha guriga si ay ugu noolaadaan guriga. Adeegyada waxaa ka mid ah dukaamaysiga, nadiifinta, iyo dhar dhaqidda. Ka wac Waaxda Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan **802-241-0294. AMA** aad websaytkooda.

### Rugaha Caafimaadka ee Gaarka ah

Kuwani waa rugaha caafimaadka carruurta. Waxay ku takhasuseen:

- Wadnaha
- Koritaanka Ubadka
- Craniofacial/Bishimaha jeexjeexan iyo Dhanxaragga
- Cystic Fibrosis
- Suuxdin/Noorooloji
- Gacan
- Xinjirowga Dhiigga ee Dhallaanka
- Metabolic
- Myelomeningocele
- Xanuunada Murqaha
- Lafaha

- Rhizotomy
- Xaalado kale

Ka wac Waaxda Caafimaadka ee Vermont **1-800-464-4343** ama **802-863-7200. AMA** aad websaytkooda.

### Adeegyada Gaarka ah

Kuwani waa kalkaaliyeyaal ama shaqaale bulsho oo caafimaad. Waxay kaa caawinayaan helitaanka daryeel caafimaad oo gaar ah oo aadan ka heli karin rugaha adeegga tooska ah. Ka wac Waaxda Caafimaadka ee Vermont **1-800-464-4343** ama **802-863-7200. AMA** aad websaytkooda.

### Barnaamijka Ogaanshaha iyo Faragelinta Maqalka Hore ee Vermont

Tani waxay siinaysaa taageero, tababar iyo maaraynta daryeelka qoysaska iyo ubadkooda, iyo bixiyayaasha bulshada. Waxay ka caawiyaan helida adeegyada baaritaanka iyo faragelinta hore. Wac **1-800-537-0076** ama **802-651-1872. AMA** aad websaytkooda.

### Caafimaadka Maskaxda

Gobolka Vermont wuxuu la shaqeeyaa wakaaladaha gobolka oo dhan. Waxay ka caawiyaan dadka iyo qoysaskooda dhibaatooyinka kharriba noloshooda. Tani waxay noqon kartaa niyad-jab sare, jirro maskaxeed, ama dhibaatooyin dabeecadeed oo daran. Waxay kaloo kaa caawin karaan helida daryeelka guryaha, sariiraha xaaladda degdegga ah, iyo daryeelka isbitaalka. Ka wac Waaxda Caafimaadka Maskaxda **802-241-0090. AMA** aad websaytkooda. Adeegyada waxaa ka mid ah:

- **Adeegyada Bukaan-socodka ee Dadka Waawayn** - Adeegyada waxaa ku jiri kara qiimeyn, la-talin, qorida dawooyinka iyo la socodka. Waxa ku jiri kara adeegyada shakhsiyaadka da'doodu tahay 60 ama ka weyn ee leh baahiyaha daryeelka caafimaadka dhimirka. Waxaa laga yaabaa in lagugu daro liiska sugitaanka.

- **Ilmaha, Dhallinta, iyo Adeegyada Qoyska** - Kani waa adeegyo iyo taageerooyin loogu talagalay qoysaska carruurtooda ama kuraygu ay qabaan arrimaha caafimaadka dhimirka. Waxay ka caawiyaan inay ku noolaadaan, bartaan, oo ku koraan iyagoo caafimaad qaba dugsigooda, iyo bulshada. Adeegyada waxaa ka mid ah baaritaanka, ka-hortagga, taageerada bulshada, daaweynta, la-talinta, iyo wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah.
- **Dhaqancelinta iyo Daaweynta Bulshada** - Barnaamijkan waxa uu ka caawiyaa dadka inay ku noolaadaan bulshooyinkooda ee qoyska, saaxiibada, iyo deriska dhexdooda. Adeegyada waxaa loogu talagalay oo keliya dadka waaweyn ee qaba noocyada cudurrada dhimirka ee daran. Waa inay sidoo kale buuxiyaan shuruudo xeerar kale.
- **Adeegyada Xaaladaha Degdegga ah -** Kani waa adeegyada xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dhimirka. Waxay furan yihiin 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Adeegyada waxaa ku jiri kara taageero taleefoon, dib u eegis fool ka fool ah, gudbin, iyo la tashi.

**Caawinta Waa La Heli Karaa 24/7**

| | |
|---|---|
| Min Niyad-jab ilaa Dhib<br>Wac 988 ama VT fariin ugu dir 741741 | Taageerada asaagga<br>Wac/Qoraal 833-888-2557 |

Khayraadka badan ee Mentalhealth.vermont.gov VERMONT VERMONT

**Barnaamijka Dhaawaca Maskaxda**

Tani waxay caawisaa dadka da'doodu tahay 16 ama ka weyn ee qaba dhaawac dhexdhexaad ah ama mid daran ee maskaxda. Waxay ka caawisaa dadka inay guryahooda ku noqdaan oo ka baxaan isbitaalada iyo xarumaha. Waxay ka caawisaa dadka inay noqdaan kuwo madaxbannaan intii suurtagal ah oo ay ku noqdaan shaqada. Ka wac Waaxda Naafada, Gabowga iyo Nolol Madaxbanaan **802-241-0294. AMA** aad websaytkooda.

**Barnaamijka Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta ama WIC**

Kani waa barnaamij loogu talagalay dhallaanka iyo carruurta ilaa da'da 5. Waxa kale oo loogu talagalay dadka uurka leh ama hadda ilmo dhalay. Waxay siisaa cunto wanaagsan waxayna baraysaa cunto cunid caafimaad leh iyo naas nuujin. Qof kasta oo ku jira Medicaid wuu heli karaa barnaamijka WIC. Tag websaytkooda. **AMA** qoraal VTWIC u dir **855-11**.

**Ka hel wax badan oo ku saabsan caawinaada beeshaada gal websaytka Vermont 211.**

**Ma qof waxbaa xadaya ama wax khiyaamaynaya si uu u helo lacagta Medicaid?**
U sheeg Qaybta Baarista Gaarka ah. Waa kan sida loo gaaro:

- Websaytka
  - Guji: Report Medicaid Fraud, Waste, and Abuse
  - Guji: Fraud and Abuse Referral Form
- **Iimayl:** ReportMedicaidFraud@vermont.gov
- **Taleefanka:** 802-241-9210
- **Faakis:** 802-871-3090 (faakis toos ah oo loo diro "Qaybta Baaritaanada Gaarka ah ee DVHA")
- **Ciwaanka Boostada:**

  DVHA Special Investigations Unit
  NOB 1 South, 280 State Drive
  Waterbury, VT 05671-1010